XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Gobanatoore

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

Heerarka Gobolka oo dhan oo Howlgalada Daryeelka Carruurta

Qeybta: Daryeelka Carruurta

Taariikhda Dhaqangalka: Maajo 16, 2020

Hagitaan Gaar ah oo loogu tallogalay Qeyba Daryeelka Carruurta

Oggolaanshaha Daryeelka Carruurta ee Degdega ah ayaa Loo Baahan Yahay:

Daryeelka Carruurta Shatiyeysan iyo barnaamijyada diiwaangashan ayaa weli looga baahan yahay in oggolaansho ay ka helaan Xafiiska Daryeelka Carruurta si ay ugu shaqeeyaan Daryeel Ilmo oo Degdeg ah ahaan. Bixiyeyaasha waa inay raacaan qaab-dhismeedka caafimaadka iyo baadqabka ee ay soo saareen gobolka iyo Qaybta Waxbarshada Hore, sida lagu xusay hagitaankan.

Cabirka Kooxda iyo Saamiyada

Xarumaha Daryeelka Carruurta waxaa looga baahan yahay inay:

- Yareeyaan tirada carruurta ee qolalka ku jira:
  - Qoyska Diiwaangashan (Registered Family, RF) - wuxuu lahaan karaa hal koox oo ka kooban ilaa 10 caruur ah.
    Ogsoonow: Bixiyeyaasha Qoyska Diiwaangashan ma lahan shuruudaha cabirka booska/dhulka ee la xiriira tirada carruurta ee ku jira daryeelka
    - Dhammaan 10-ka cunugba, waa in kuwa ah ama ka yar da'da dugsiga xannaanada iyo barbaarinta aysan ka badnayn lix cunug iyo, in lixdaan cunug, aysan ku jirin in kabadan laba cunug oo ka yar 24 bilood.
  - Qoyska Sharciyeysan (Certified Family, CF) - wuxuu lahaan karaa laba koox oo xasilloon oo ka kooban ilaa 10 carruur kuwaasi oo jooga aagag kala duwan ee goobta xanaanada mana lahaan kara in wadar ahaan ka badan 16 carruur. Koox kasta oo caruur ah waa inay ku jirtaa boos buuxinaya shuruudaha booska ee ah boos ugu yaraan ah 35 fuud cunugiiba.
    - Koox walba oo carruur ah waa inay buuxiyaan saamiyada shaqaalaha /canuga sida lagu qeexay Sharciga Maamulka Oregon 414-350-, oo ka tirsan Sharciyada Daryeelka Carruurta La Xaqiijiyay (bogga 28).
  - Xarunta Sharciyeysan (Certified Center, CC) - waxay lahaan kartaa hal koox oo xasiloon oo ka kooban ilaa 10 carruur fasalkiiba. Qolalka waaween ayaa loo kala goyn karaa labo qol haddii uu oggolaado takhasusle ka socda bixinta laysinka daryeelka carruurta. Fiiri Sharuudaha Badbaadada ELD-OHA COVID-19 iyo Isbadelada Ku meelgaarka ah ELD ee Sharciyada Daryeelka Carruurta ee Looga

Jawaabayo Xaalada Degdega ah ee COVID-19 ee Gobolka si aad uga hesho tilmaamo dheeraad ah. Koox kasta oo caruur ah waa inay ku jirtaa boos buuxinaya shuruudaha booska ee ah boos ugu yaraan ah 35 fuud cunugiiba.

- Xarumaha Sharciyeysanwaa inay joogteeyaan saamiyada shaqaalaha iyo caruurta ee soo socda (saamiyada caruurta da'doodu kala duwan tahay waxay ku saleysan yihiin da’da canuga ugu yar kooxda). Eeg shaxda hoose.

Da’da	Saamiga	Qiyaasta Ugu Badan ee Kooxda (caruurta).
Lix usbuuc ilaa 23 bilood	1:4	8
24 bilood ilaa 35 bilood	1:5	10
36 bilood illaa dugsiga xanaanada	1:10	10
Dugsiga xannaanada iyo wixii ka sareeya	1:10	10

Shuruudaha Kooxaynta

Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta waxaa looga baahan yahay inay:

- Xaqiijiyaan in kooxaynta ay xasilloon tahay (tusaale ahaan, shaqaalaha qaangaarka ah ama tabaruceyaasha iyo carruurtu isleh waa inay ku wada jiraan isla koox maalin kasta).
- Ku bixi daryeel kooxyo xasilan oo 10 carruur, si kastaba, barnaamij ayaa u ogolaan karo qoysaska qaar inay "kala bedeshaan" boosaska oo maalmo u dhaxeeyo. Tusaale ahaan - Cunug A wuxuu xaadiraa Isniinta, Arbacada, Jimcaha halka Cunug B-na uu xaadira Talaadada iyo Khamiista. Si kastaba ha noqotee, caruurta ku jirta koox xasiloon waa inaysan ka badnaan karin 12 carruur.
- Daryeelka ku bixiyaan kooxo xasiloon oo isticmaalo isla hal goob maalin kasta.
- Keliya qaab joogto ah oo aan ahayn ku-meelgaar uga wadaan carruurta koox xasiloon ayna ku wareejiyaan koox kale (tusaale ahaan, markay carruurtu da 'ahaan ka weynaadaan fasalkoodii asalka ahaa).
- Ilaa intii suurogal ah ay maalin kasta u xilsaaraan isla shaqaalaha taageerada (waxaa loola jeeda, shaqaalaha bixiya taageerada xilliyada nasashada) isla kooxda xasilloon.
- Goobaha la wadaago (musqulaha, meelaha bannaanka ah ee lagu ciyaaro, iyo meelaha wax lagu cuno) ay wakhtigiiba u oggolaadaan carruur ka tirsan hal koox oo xasilloon. Dhaqanada nadiifinta waa in la raacaa kadib marka ay koox isticmaasho goobahan iyo kahor inta aysan koox kale isticmaalin.
- Wixii bixiyayaasha guriga ku saleysan, waxay u baahantahay in xubnaha qoyska aanan ku caawin barnaamijka daryeelka carruurta waxay joogteeyaan kala fogaanshaha jir ahaanta oo kooxyo xasilan oo inta lagu jiro maalinta.

    - Haddii caruurta daryeel bixiyaha ama xubne kale ee ka tirsan qoyska daryeel bixiyaha ay ka mid yihiin kooxda, waa in lagu tiriyaa inay qayb ka yihiin tirada guud ee caruurta la oggolaan karo in kooxdu ka koobnaato.
- Hirgeli nidaamyada nadiifinta ku fillan oo u dhaxeeyo fasalada SUBAXNIMO iyo GALABNIMO oo isticmaalo isla booska muuqaalka, oo ay ku jiraan nadaafada aagaag cunto diyaarinta, sagxadaha aadka loo taabto, boombalooyinka iyo aqabyada. Ugu badnaan laba kooxood oo carruur ah ayaa loo ogolaan karaa isla hal fasal maalintii oo dhan.
- Yareeyaan wakhtiyada imaatinka iyo keenida caruurta ama ay dejiyaan nidaam kale oo lagu xaddidayo istaabashada ama isku dhawaashada jireed ee qoysaska iyo shaqaalaha.

Hawlwadeenada

Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta waxaa looga baahan yahay inay:

- Dib u eegida iyo fullinta Hagida Guud oo Badrooniyada.
- Sii wadaan inay mudnaan siiyaan daryeelka shaqaalaha muhiimka ah oo waxay sidoo kale u adeegi kartaa qoysaska oo dhan oo ku soo laabtay shaqada oo dib u furida la bilaabay ee Oregon.
- Cadeec oo u hogaansan Sharuudaha Badbaadada ELD-OHA COVID-19 iyo Isbadelada Ku meelgaarka ah ELD ee Sharciyada Daryeelka Carruurta oo Jawaab celinta u ah Xaalada Degdega ah ee COVID-19 ee Gobolka marwalba.
- Joogtey nidaamyada nadiifinta ee la ansixiyay ee OHA-ELD ee loogu talagalay sagxadaha, go'yada, korontooyinka, boombalooyinka si looga hortago faafida COVID-19.
- Siiyaan shaqaalaha tababar joogto ah oo ku saabsan nidaamyada nadiifinta iyo shuruudaha baadqabka ee COVID-19.
- U oggolaadaan shaqaalaha inay xirtaan maro, xaashi ama dabool fur-oo-tuur ah oo lagu daboolo wajiga haddii ay doortaan.
- Isticmaalka daboolka wajiga laasim uga dhigaan shaqaalaha taageerada xiliyada nasashada iyo shaqaalaha baaritaanada caafimaad ee maalinlaha ah ku sameeya caruurta.
- Hayaan diiwaannada maalinlaha ah ee koox kasta oo xasiloon oo buuxinayso shuruudaha soo socda si loo taageero raad-raacida dhacdooyinka cudurka haddii loo baahdo:
    - Magaca canuga
    - Waqtiga keenida/qaadida
    - Qofka qaangaarka ah ee keenayo/qaadayo cunuga
    - Dhamaan shaqaalaha ku lug leh kooxda caruurta ee xasiloon (oo ay ku jiraan shaqaalaha taageerada xiliyada nasashada)
    - Saacadaha uu cunuga ku jiray goobta daryeelka

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waji daboolashada:

- Caruurta ka weyn da'da 2 sano way xiran karaan daboolada wajiga haddii ay ku jiraan kormeerida dhow ee qofka weyn.
- Caruurtu da' kasta ha ahaadaan waa in aanay xidhan maaskarada wajiga:
    - Hadday qabaan xaalad caafimaad oo ku adkaynaysa inay neefsadaan iyaga oo xidhan maaskarada wejiga;
    - Haddii ay qabaan naafo ka hor joogsanaysa inuu xirto qofku daboolka wejiga;
    - Haddii ay awoodi waayaan inay isaga saaraan maaskarada wejiga si madax banaan; ama
    - Marka ay hurdayaan.
- Maaskarada wejiga loogama baahnaan karo in carruurtu adeegsato mana aha inay ka mamnuucdo ama ka hor istaagto helitaanka tilmaamaha ama nashaadaadka.

Diyaarinta Daryeel Kale:

Hagitaankan ayaa sidoo kale lagu dabaqi karaa barnaamijyada kale ee waxbarashada hore, sida daryeelka nasinta, barnaamijyada dugsiga xagaaga, kala-gudubka dugsiga xanaanada, iyo barnaamijyada diiwaangashan. Barnaamijyadani waa inay waafaqaan isla tilmaamaha barnaamijyada daryeelka carruurta ee lagu sheegay dukumiintigan laakiin qaabka barnaamijkooda awgii lagama filayo inay mudnaanta koowaad siiyaan qoysaska iyagoo ku saleynayo shaqada.

Ilo Dheeraad ah:

- Calaamado aad faafin karto
- Tilmaamaha Maaskaraha, Waji Daboolashada, Weji Daboolka
- Hagista OHA ee Dadwaynaha Guud
- Hagista Guud ee OHA ee Loo-shaqeeyayaasha
- Hagida CDC ee Maamulayaasha Jardiinooyinka iyo Xarumaha Madadaalada

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintiyo qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.